

Fiise waa oggolaansho kuu oggolaanaysa inaad Norway iyo dalaka kale ee Schengen soo gasho muddo xadidan oo ah ilaa 90 maalmood.

**Waxaa fiise booqasho lagu siin karaa haddii aad Norway u imaanayso dalxiis, booqasho qoys, shaqo dawladeed ama safar ganacsi, booqasho waxbarasho ama dan kale oo aan looga baahnayn oggolaansho shaqo ama oggolaansho joogitaan.**

Fiisaha Norway iyo dalalka kale ee ku jira Schengen wuxuu ugu badnaan soconayaa 90 maalmood. Caadi ahaan fiisaha lama cusbooneysiin karo marka la soo galo meel ka mid ah Schengen. Taa waa laga leexan karaa, haddii wax aan la fileyn ay dhacaan ka dib markaad soo gashay gudaha Schengen, islamarkaana fiisihii lagu siiyay uu ahaa mid ka yar 90 maalmood. Muddada guud ee la joogayo Schengen marna 90 maalmood kama badan karto lixdii bilood ee u danbaysay. Fiisaha Norway ku siisay wuxuu ka shaqeynayaa dhammaanba dalalka Yurub ee ku jira Schengen.

## **Yaa u baahan inuu fiise codsado si uu Norway i yimaado?**

Caadi ahaan dadka oo dhan waxay u baahan yihiin fiise si ay Norway u soo booqdaan. Dadka ka yimid dalalka aan la leennahay heshiiska fiise-ka-dhaafidda waa laga daynayaa waajibka fiisaha. Halkan ayaad ka heli kartaa liiska dalalka aan fiisaha u baahnayn [www.udi.no](http://www.udi.no) ama warbixin la xiriirta fiisaha ka raadso xarunta arrimaha dibedda ee norwiiijiga ee kuugu dhow.

Kuwa aan waajibka fiisuhu saarnayn waxaa ka mid ah:

- Dadka haysta dhalashada dalalka waqooyiga
- Dadka ajnebiga ah ee ka haysta baasabboor shaqeynaya dalalka ay Norway la gashay heshiis ku saabsan fiiso la'aan
- Dadka haysta baasabboorka ajnebiga ee Norway laga baxshay kaas oo shaqaynaya
- Dadka haysta baasabboorka qaxootiga ee Norway laga baxshay kaas oo shaqaynaya
- Dadka oggolaansho joogitaan iyo mid shaqo ka haysta Norway iyo dalalka kale ee Schengenka

## **Xagee baan ka codsan karaa fiisaha Norway?**

Codsiga fiisaha waxaad geyneysaa saldhigga arrimaha debedda ee norwiiijiga ee kuugu dhow. Codsiyada fiisayaasha badankooda halkaas ayaa lagaga baaraandegaa. Mararka qaarkood codsiga waxaa loo sii gudbin karaa Agaasinka ajnebiga iyaga ayaana go'aan ka gaara.

## **Lacagta fiisaha**

Lacagta fiisaha waxaa la bixiyaa marka codsiga la xaraynayo. Lacagaha fiisaha ka eeg [www.udi.no/gebyr](http://www.udi.no/gebyr) ama laxiriir xarunta arrimaha dibedda ee norwiiijiga ee kuugu dhow.

## **Muddo intee le'eg ayey qaadata ka baaraandegidda codiga fiisaha?**

Haddii codsigaaga lagaga baraandego saldhiyada arrimaha debedda waxay qaadaneysaa caadi ahaan qiyaastii labo toddobaad inta aadan helin jawaabta codsiga. Muddada ka baaraandeggu waxay ku xidhan tahay badnaanta shaqada uu hayo saldhigaasi arrimaha debedda. Weydii mudadda ka baaraandegidda meeshaas aad ka codsaneysid. Haddii codsiga loo soo gudbiyo Norway iyo Agaasinka ajnebiga (UDI), muddada ka baaraandegiddu intii hore wey ka dheeraaneyso. Warbixin dhammaystiran oo la xiriirta muddada ka baaraandegidda ka eeg bogga internetka ee [www.udi.no/saksbehandlingstider](http://www.udi.no/saksbehandlingstider).

## **Dukumiintiyada laysaga baahan yahay**

- Foomka codsiga
- Sawirku waa inuu ahaada mid loo aqoonsaday mid fiise lagu dhejin karo. Eeg shuruudaha sawirka [www.udi.no](http://www.udi.no).
- Baasabboor/dukumiinti socdaal oo shaqaynaya
- Casuumaad qoraal ah ka timid qof la tixraaco oo Norway ku sugan
- Caddeyn qaraabannimo (haddii aad isku qoys tihiin qofka la tixraacayo)
- Caddeyn lacagta aad haysato ee aad ku joogeyso ama caddaynta dammaanadda ee qofka la tixraacayo ka timid eeg internetka UDI.
- Shuruudaha dukumiintiga ee dalalku waa kala duwan yihiin, waana la bedeli kara. Qofka ajnebiga ah ee looga baahan yahey fiisaha isla markaana soo hoos gelaya heshiiska- EØS ama

heshiiska- EFTA waxaa khuseeya xeerar u gaar ah.

### **Haddii fiise lagu oggolaado**

Waa inaad haysataa caymis safar iyo mid jirro/bukaan oo ka shaqaynaya dhammaanba dalalka Schengen. Lacagta ugu yar ee caymisku daboolayo waa inay ahaataa 30 000 EURO. Caddaynta caymiska waa in la keenaa marka fiisaha la bixinayo.

Warbixin intaa ka badan waxaad kala xiriiri kartaa saldhigga arrimaha debedda ee norwiiijiga ee kuugu dhow. Haddii aad Norway joogtana, waxaad la xiriiri kartaa booliiska ama Agaasinka ajnebiga (UDI).

Haddii aad dooneysid inaad wax ka barato ka shaqayso amaba aad la sii deggenaato xaaskaaga/qoyskaaga Norway, waa inaad markaa dalbato oggolaansho joogitaan ama oggolaansho shaqo. Faahfaahin dheeraad ah ka akhriiso

[www.udi.no](http://www.udi.no)

## **Su'aalo caadi ah**

### **Ma u baahanahay inaan fiise codsado markaan Norway ka codsanayo oggolaansho joogitaan iyo oggolaansho shaqo?**

Fiisaha Norway/dalalka Schengen lagu siin maayo haddaad Norway degeyso. Laakiin codsabayaasha qaar baa la siin kara fiise ay dalka ku soo galaan (fiisaha D), ka hor intaan laga baaraandegin codsigii oggolaanshada joogitaanka iyo kii oggolaanshada shaqada. Tani waxay dhacaysaa haddii aad doonaysid inaad Norway si rasmi ah u joogto, oo aad buuxiso shuruudaha lagu helo oggolaanshada joogitaanka iyo oggolaanshada shaqada. Warbixin intaa ka badan waxaad kala xiriiri kartaa saldhigga arrimaha debedda ee norwiiijiga ee kuugu dhow ama [bogagga internetka ee UDI-da](http://www.udi.no)

### **Sidee ayaan u codsanayaa haddii aan Norway ku guursanayo?**

Haddii aad rabto inaad ku guursato ood joogto Norway, waxaad codsan kartaa oggolaansho joogitaan oo soconeysa ilaa lix bilood si aad u guursato. Waa inaad oggolaansho joogitaan ka codsataa saldhigga arrimaha debedda ee dalkaaga ama dalkii aad joogitaanka sharciga ah ka haysatay lixdii bilood ee ugu danbeeyay. Haddii aad soo booqanayso qof aad saaxiib tihiin oo aad dalkii ku laabanaysid booqashada

ka dib, waxaad codsan kartaa fiise booqasho oo soconaya ilaa 90 maalmood.

### **Maxaan aniga u baahanahay si aan u helo fiise?**

Waa inaad haysataa baasabboor shaqeynaya si aad Norway u soo gashid. Baasabboorku waa inuu ahaada mid shaqeynaya ugu yaraan 90 maalmood oo ka danbaysa muddada fiisuhu socdo. Waa inaad haysata lacag kugu filan oo aad ku dabooli kartid safarka iyo joogitaanka Norway. Haddii aanad lacag haysan waxaa lagugu joojin kara xudduudda in kastoo fiise lagu siiyey. Mararka qaarkood waxaa kugu filan in qofka la booqanayo uu dammaanad ka qaado dhaqaalaha ku baxaya joogitaanka iyo laabashada. Foomka dammaanadda waa inuu buuxiyaa qofka la soo booqanayo ee Norway jooga (referansepersion), waana in laga soo shaambadeeyo booliska. Foomka dammaanadda waxaa laga soo qaadan karaa saldhiga arrimaha debedda ama internetka [www.udi.no](http://www.udi.no) Foomka dammaanadda waxa lala xaraynayaa codsiga fiisaha.

Waa inay suuragal kuu tahay inaad si sharci ah ugu noqoto dalkii hooyo ama waddan kale kaasoo aad ku leedahay oggolaansho joogitaan.

Waa inay ujeeddadaadu tahay inaad Norway ka baxdo marka fiisadu dhacayso. Haddii ay jirto sabab ay dawladda Norway ugu maleyso inaad waddanka joogeysid muddo ka baxsan tii ad fiisaha u dalbatay, waa la diidi karaa codsiga.

Waa inaad ka diiwaan gashaneyn habka wargelinta ee Schengen (SIS) oo aanu jirin mid ka mid ah waddamada – Schengen oo aan lagu oggolayn.

### **Ma inaan galaa waddanka aan fiisaha ka codsaday?**

Maya. Waxaad gali kartaa waddanka aad rabto ee ka mid ah waddamada -Schengen mar haddaad fiise heshay, laakiin haddii aad doonaysid inaad joogto waddan kale in ka badan inta aad Norway joogeys, markaa waa inaad ka dalbataa fiise waddankaas safaaraddiisa.

### **Ma waxaan u baahanay fiisooyin badan si aan u booqdo dhawr waddan oo Schengen ah?**

Maya. Fiisaha aad ka qaadato Norway ayaa ka socda dhamaan waddamada Schengen.

### **Ma heli karaa fiise ka badan saddex bilood haddii aan booqanayo waddamo badan?**

Maya. Waxaad heli karta fiise 90 maalmood ama in ka

The Norwegian Directorate of Immigration  
P.O. Box 8108 Dep.  
N-0032 Oslo  
Office address: Hausmannsgate 21

Phone: +47 23 35 15 00  
Fax: +47 23 35 15 15  
[www.udi.no](http://www.udi.no)  
E-mail: [udi@udi.no](mailto:udi@udi.no)

Last updated: 13.02.2007

**UDI**  
Norwegian Directorate  
of Immigration

yar ah. Waa inaad Schengen-ka ka baxdaa ka hor intaan fiisahaagu dhicin. Haddii aad bixi weydo marka fiisahaagu dhaco, waxay taasi saamayn ku yeelan kartaa imaatinkaada danbe

### **Cabasho ma qaadani karaa haddii codsiga la ii diido?**

Haa. Haddii aad cabasho ka qaadato go'aanka laga gaadhey saldhigga arrimaha debedda, waxaa kiiska loo sii gudbinayaa UDI si ay u eegto. Haddii aad cabasho ka qaadato go'aankii laga gaadhey UDI, waxa markaa kiiska loo sii gudbinayaa guddiga dacwooyinka arrimaha ajnebiga (UNE). Eegidda cabashadu waa bilaash.

### **Ma doonaysaa inaad heshid warbixin dheeraad ah ee fiisaha Norway?**

Haddii aad doonaysid inaad heshid warbixin dheeraad ah ee fiisaha, waxaad la xiriiri kartaa saldhigga arrimaha debedda Norway ee kuugu dhow. Haddii aad ku sugan tahay Norway, waxaad la xidhiidhi kartaa Adeegga wargelinta ee codsadyaasha ee UDI-da kaas oo su'aalaha uga jawaaba af-norwiji, af-ingiriis iyo luuqado kale – tlf. 23 35 16 00 ama e-post [ots@udi.no](mailto:ots@udi.no)